

Heshiiska Qabashada Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada ee Jamhuuriyadda Somaliland sannadka 2020-ka

Hargeysa, 27th February 2020

Hor-dhac

- Markii la aqoonsaday muhiimadda ay leeyihiin Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada;
- Markii la garwaaqsaday caqabadaha hor-yaalla hannaanka doorashada ee xilligan;
- Markii la yaqiinsaday ka go'naanshaha Xisbiyada Siyaasadda ee ah in si wada-jir ah looga gudbo heshiis la'aanta iyo in la gaadho heshiis loo dhan yahay oo lagu qabto doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada, kuna dhaca si nabad ah, xor iyo xalaal ah, sannadka 2020-ka.

Sidaa daraadeed, Saddexda Xisbi Qaran ee KULMIYE, UCID iyo WADDANI waxa ay ku heshiiyeen Qodobbada soo socda:

Qodobka 1aad:

Ujeeddada Heshiisku waa in la dejiyo hannaan wada-shaqayneed oo ay yeeshaan dhammaan dhinacyadu, oo ay ka mid tahay nidaamka xallinta khilaafaadka, si loo qabto doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada sannadka 2020-ka.

Qodobka 2aad:

Waajibaadka iyo Masuuliyadaha Qabashada Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada

1. Guddida Doorashooyinka Qaranku waxa ay leeyihiin awooda sharci ee doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada, waxaanay u igmanayaan Guddida Farsamada Maamulka Doorashooyinka dhammaan qabadashada hawlaha farsamo ee doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Golaha Wakiillada, si waafaqsan Xeerarka iyo Qawaaniinta Doorashooyinka dalka ee jira, sida:

1. Xeerka Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada, Xeer Lr. 20/2001, oo uu weheliyo Kaabistii iyo wax-ka-beddelkii lagu sameeyey 2011.
2. Xeerka Doorashada Golaha Wakiillada, Xeer Lr. 20-2/2005
3. Xeerka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 37/2007, oo uu weheliyo Kaabistii iyo Wax-ka-beddelkii lagu sameeyey 2014 iyo 2016.
4. Xeerka Anshaxa Axsaabta Qaranka – 2017
5. Xeerka Anshaxa Saxaafadda – 2017

6. Xeerka Anshaxa Xisbiyadda Siyaasadda ee Hannaanka Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaayasha - 2009

Qodobka 3aad:

Waajibaadka iyo Masuuliyadda Xubnaha Guddida Doorashooyinka Qaranka

Si Guddida Farsamada Maamulka Doorashadu (TEMU) ugu diyaar-garoobaan shaqadooda, Guddida Doorashooyinka Qaranku waxay ka masuul yihiin u gudbinta Xukuummadda ee Miisaaniyadda Doorashooyinka, magacaabista, caydhinta, xulashada iyo anshax-marinta shaqaalaha iyo ku dhawaaqidda Taariikhda Doorashada iyo Natiijooyinka Doorashooyinka.

Qodobka 4aad:

Xubnaha Guddida Farsamada Maamulka Doorashada (TEMU)

Xubnaha Guddida Farsamada Maamulka Doorashadu waxa ay ka koobnaan doonaan:

1. Xubnihii hore ee Guddida Doorashooyinka Qaranka, (7 Xubnood) oo ah xubno cod leh.
2. Saddex Xubnood oo ka socda Bulshada Caalamka, (3 Xubnood) oo ah xubno aan cod lahayn.

Sarkaalka u sareeya (Officer) iyo Ku-xigeenka (Deputy Officer) Guddida Farsamada Maamulka Doorashada waxa laga dhex-dooran doonaa Xubnaha Codka leh ee Guddida Farsamada.

Qodobka 5aad:

Waajibaadka iyo Masuuliyadda Gaarka ah ee Guddida Farsamada Maamulka Doorashada

Waajibaadka iyo Masuuliyadda gaarka ah ee Guddida Farsamada Maamulka Doorashada ee ay qayb ka mid ah waajibaadkooda iyo masuuliyaddooda ku xusan Qodobbada 14-15 ee Xeerka Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada ee Xeer Lr. 20/2001, u wakiisheen Guddida Doorashooyinka Qaranku waa sidan soo socota:

1. Socod-siinta hawl maalmeed qabashada Doorashooyinka Golayaasha Deegaanka Iyo Golaha Wakillada.
2. Diyaarinta Miisaaniyadda lagu maamulayo hawlaha doorashooyinka iyo u gudbinta Guddida Doorashooyinka Qaranka iyo u soo diyaarinta qabyo-qoraalka Xisaabaha Saddex-biloodka ah Guddida Doorashooyinka Qaranka, si ay ugu gudbiyaan Xisaabiyaha Guud ee Qaranka.
3. Soo diyaarinta Taariikhda la qaban karo doorashooyinka iyo u gudbinta Guddida Doorashooyinka Qaranka, si ay Guddida Doorashooyinka Qaranku soo-jeedinta maalinta

doorashada ugu gudbiyaan Madaxweynaha JSL, si uu ugu soo saaro Wareegto Madaxweyne.

4. Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha ka hor taariikhda doorashada.
5. Samaynta Daraasado la xidhiidha Goobaha Cod-bixinta, qoon-daynta tirada iyo goobaha cod-bixinta Degmooyinka iyo Gobollada.
6. Diyaarinta magacaabista, caydhinta ama anshax-marinta shaqaalaha ee Xarunta Dhexe iyo Xafiisyada Doorashooyinka ee Degmooyinka iyo Gobollada.
7. Hubinta Goobaha Cod-bixinta iyo goobaha kale ee la xidhiidha masuuliyaddooda ee lagu xusho hab bakhtiyaa-nasiib ah iyo hab qorshayn intaba.
8. Ka gar-naqista iyo dhex-dhexaadinta khilaafaadka la xidhiidha doorashooyinka, kuwaas oo Saaraakiisha Doorashooyinka ee kala duwan u soo gudbiyeen.
9. Curinta Shuruucda, Siyaasadaha iyo Xeerarka Anshax-marinta Doorashooyinka ee Xisbiyada Siyaasadda iyo Saxaafadda.
10. In ay ahaadaan Masuuliyiinta ay la xidhiidhayaan dhammaan Danneeyayaasha Doorashooyinka oo ay ka mid yihiin, Bulshada Caalamka, Hay'adaha Fulinta, Bulshada Rayidka ah iyo in ay taageeraan Ciidanka Ammaanka.
11. Isku-gaynta natiijooyinka doorashooyinka ee Degmooyinka iyo Gobollada iyo u gudbinta Guddida Doorashooyinka Qaranka, si ay ugu dhawaaqaan natiijooyinkaasi, ka hor inta aanay Maxkamadda Sare ansixin.
12. Muddada Xilka Guddida Farsamada Maaamulka Doorashooyinku waxay ku eg-tahay maalinta ay Maxkamadda Sare ku dhawaaqdo Natiijadda Doorashooyinka.

Qodobka 6aad:

Xallinta Khilaafaadka

Khilaaf kasta oo ka yimaada ama la xidhiidha Heshiiskan ama Wax-ka-beddelkiisa ama Fasiraaddiisa waxa ka gar-naqaysa, xalna ka gaadhaysa Maxkamadda Sare muddo 14 cisho gudahood ah. Go'aanka ay gaadho Maxkamadda Sare waa go'aan kama dambays ah, waxaanu waajib ku yahay fulintiisu dhammaan dhinacyada, iyaga oo aan lahayn wax xuquuq rafcaan ah.

Qodobka 7aad:

Sharciga Lagu Dhaqayo iyo Luuqadda Rasmiga ah ee Heshiiska

Sharcigan waxa loo fasirayaa, loona fulinayaa si waafaqsan Xeerarka Somaliland.


Heshiiskani waxa uu dhaqan-galayaa marka ay dhinacyadu saxeeaan.

SAXEEXYADA:

1. Muuse Biixi Cabdi,
Madaxweynaha JSL, Ahna Guddoomiyaha Xisbiga KULMIYE



2. Eng. Faysal Cali Waraabe,
Guddoomiyaha Xisbiga UCID



3. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro),
Guddoomiyaha Xisbiga WADDANI

